

Kalmadaha Sharciga oo Aytahay Inaad Ogaato

- **Arraignment: Kala Sooc:** Maxkamadeen, marka eedysanaha la' soo taago maxkamada oona loo aqriyo dambiga lagu soo oogay, intaa kadib eedeysnaha ayeetahay in uu labo mid ku dhawaaqo: inuu dambiga lagusoo eedeye geestay ama in dambigaas uusan geysan.
- **Bond: Dhammaanad:** Madax furasho, ama lacak damiin ahaan loo baxsho uu eedaysanaha bixiyo si uusan xabsi ugalin ilaa dacwada maxkamada ka soo afjaranto.
- **Continuance or Continued:** Sii Wadid: sii socodsiin hawsha maxkamada, u-sii amaahid maalin kale.
- **Defendant: Eedeysnaha:** Qofka dacwada lagu soo oogay.
- **Hearing: Dhageysiga:** Dhagaysiga maxkamada, aqbaarta garsooraha dhageysto si uu go'aan u-gaaro.
- **Plaintiff: Dacwo-ooge:** Kiis dambiyeedka, xukuumada ayaa dacwada ku soo oogta eedeysanaha.
- **Pre-trial: Hordhaca-maxkamada:** Xiligia dageysiga marka xeer ilaaliyaha iyo qareenka eedeysanaha ay kulmaan si ay ooga wada hadlaan xaqiiqda kiiska.
- **Prosecutor: Xeer-ilaaliye:** Qareeyn ka socda dawlada, kaas oo matalaya kiiska lagu soo oogay eedeysanaha.
- **Sentencing: Xukmin:** Dhageysi maxkamadeedka, marka gar-sooraha ama xeerbeega loo doortay inay garsooraan ay go'aamiyaan ciqaabti eedeysanaha lagu qaadi lahaa.
- **Subpoena: Dalab maxkamadeed:** dukumintiyaal sharci ah oo marqaatiga amraya in uu maxkamada soo istaago.
- **Testimony:** Marag: Maxkamada dhexdeeda marqaatiga la dhaarshey marka uu marag furaayo ama qeexaya.
- **Trial: Maxkamadeenta:** Dhageysiga maxkamada si loo go'aamiyo natiijada kiiska kadib marki cadeemihi iyo marqaatigi la' soo bandhigay.

odvn.org | 800-934-9840

Wixii kaloo aqbaar dheeraad ah ku saabsan qorsheeynta amniga ama nabadgalayada, xog helka dadweynaha ama barnaamijyada quseeya qalalaasaha ka dhaco guriga iyo adeegyo kuu dhaw, la xariir xarunta kuugu dhaw ee qaabilsan barnaamijka rabshadah guriga:



**Shabakada Qalalaasaha Guriga ee Ohio:
Ohio Domestic Violence Network:
800-934-9840 or 614-781-9651
www.odvn.org**

Aqbaaraad ku saabsan helitaanka sharci ka caawinta oo bilaashka ah oon qarash kaaga bixin fadlan la xariir Adeega Sharciga Ee Ohio:
**Ohio Legal Services:
866-lawohio (866-529-6446)
www.ohiolegalhelp.org**



The Ohio Domestic Violence Network (ODVN) is a statewide coalition of domestic violence programs, supportive agencies, and concerned individuals working together to stop domestic violence through education, information and training for those who are affected by domestic violence, and by promoting social and systems change.

This project is supported by Grant No. G-19010HSDVC awarded by the Department of Health & Human Services, Administration for Children and Families (ACF), Administration on Children, Youth, and Families (ACYF), Family and Youth Services Bureau (FYSB). The opinions, findings, conclusions, and recommendations expressed in this publication, program, exhibition are those of the author and do not necessarily reflect the views of the Department of Health & Human Services.

odvn.org | 800-934-9840

SOMALI CRIMINAL COURTS BROCHURE

**QALALAASAH
KADHACO
GUDAHA QOYSKA
WAXAA LOO
AQOONSANY
AHAY DAMBI**



Qalalaasaha ama xadgudubka ka dhaca qoyska gudihiisa waxay sal kuleedahay oo ka dhasho xakamayn ama in qof la'qasbo ay timaado. Qaar ka mid ah xadgudubyadaas ayaa loo ictiraafsanayahay fal dambiyeed guduha gobalka. Waxaad wici kartaa xukuumada ama booqankartaa xafiiska xeerilaaliyaha kuugu dhaw si aad u warbixiso fal dambiyeedkaas.

Inta badan waxaa qatarta ama dhibaataada kugu kordhiyo marka aad ku fikirto ama ku dhaqaaqdo in aad soo afjarto xariirka idiin dhaxeeya adiga iyo qofka kugu hayo xadgudubka. Waxaa jira sharcigaal laga yaabo inay sugaan nabadgalyadaa lakiin ma kuu fidinkaraan dammaanad qaad buuxda aad ku hesho amni. Waa muhiim in a qorsheeyo hab ku dheehan nabadgalyo xiliga aad isticmaaleysa nidaamka dhexe ama sharci dambiyeedka. Waxaad wacdaa xarunta kuugu dhaw ee qaabilsan barnaamijka rabshadaha ka dhaca guriga si aad wax ooga barato arimo ku saabsan qorsheenta nabadgalyada.

Tilaawoonyinka Kiisaska Dambiyada yar ama Falfalxumda

Fadlan ogoo in talaabooyinkan ay yihiin kuwo caadi ah, laakiin waxaa suurta gal ah in kiiskaagu uu ka duwanaa karo tilaabooyinkiiisa. Aqbaaraad dheeri ah oo quseeya kiiska dambiyada gaarka ah, fadlan la xiriir xafiiska xeer ilaaliyaha kuugu dhaw ama qolada udooda dhibaneyaasha ee deegaankaaga.

1. Danbiga waxaa wariya dhibanaha, marqaatiga ama xoojinta xukuumada sida askarta oo kale.
2. Xoojinta Xukuumada ama xeerilaaliyaha ayaa go'aamiya dambi ku oogista marka ay helaan cadeemo ku filan oo dambi lagu oogi karo.
3. Xeritaan ayaa la sameeya ama waxaa loogu baaqaa eedeysanuhu in uu maxkamada soo hor is- taago. Tani waxay ka dhici kartaa goobta faldambiyeedka ama waqti ka dambeeya xiliga fal dambiyeedka la geestay.
4. Marka (ama ka hor) maxkamadeenta, ayaa eedeysanaha loo aqriyaa dambigi lagu soo oogay, ka dib eedeysanaha wuxuu codsankaraa qareen ama wuu qiran karaa dambiga. Waxaa xiga lacakta dammaanaqaadka oo uu eedaysanaha kaga wareego xabsiga. Dhibanaha wuxuu codsankaraa amarka maxkamada oo ah ilaalinta ku meel gaarka si dhibanaha u helo nabadgalyo. Haddii aysan jirin qirasho dambi, kadiba waxaa la dajinaa taariikh dambe (hordhaca-maxkamada) la'isugu soo laabto maxkamada.
 - a. **Mararka qaarkood, waxaa dhaca in eedeysanaha lagu siidaayo lacak dammaad ah iyada oon dhicin dhagaysi maxkamadeedka ama hordhaca dhageeysiga maxkamada.** Tani waxaa lagayaabaa inay micnaheedu tahay inaad fursad uweydo codsiga amarka maxkamada ee ilaalinta ku meelgaarka ah ka hor inta aannan eedeysanaha la siideyn. Haddii isla markaas aad u-baqdo ama ka walwasho nabadgalyo la'aan, laxariir udoodaha kuugu dhaw ama qareenkada si deg-deg ah. Ha sugin in la raad raaco si wax looga qabto amnigaaga.
5. Haddii aysan dhicin qirasho dambi, mooshin ayaa la gudbin karaa iyo / ama heshiis lagu qirto dambiga ayaa macquul noqonkara in laysku afgarto ka hor maxkamada ama xiliwalba ka horeeya inta aanan maxkamadu bilaaban. Haddii la helo qirasho dambi, ama eedaysanah uusan la tartamin maxkamada oona codsanin dageysi

dambe, maxkamada si deg-deg ah ayee ugu gudbee xukunkeeda (fiirso tilaabada 8).

6. Haddii aannan lagaarin wax heshiis qirasho dambi ah, waxaa sii soconaya maxkamadeenta tiro maalma dhoowr ah ilaa eedeysanah ka quusto uu baxsho xaquuqdiisa si deg-deg ah.
7. Garsooraha maxkamada ama xeerbeegtida waxay go'aan ku garaan in eedaysanaha uu yahay dambiile ama uusan lahayn dambe.
8. Haddii ay ku cadaato eedeysanaha inuu yahay dambiile, waxaa laga yaabaa in garsooraha ku dhawaaqo xukunka ama dajiyi taariikh la'isugu soo noqdo xukun ridida. Ka hor intuuusan garsooraha ku dhawaaqin xukunka dhibanaha wuxuu xuquuq uleeyahay in uu q eexo ama bayan kabixiyo sida fal dambiyeedkaas usaameeye nolashiisa/ nalasheeda.
9. Xukunka (ciqaabta) waxaa ka midnoqon kara: waqti lagu-xabiso, xakamayn bulsho, magdhow, iyo/ ama ganaax. Xakamaynta bulshada waa qaab kormeer ama korjoogteyn ah (oo sarkaalka asluub dhowrka ama kaliya kombiyuutarka lagu hubinayo) si loo ogaado in eedaysanuhu u hogaansanaado qaanuunka uu khaaligu ama xaakinka amray. Shuruudaha oo tijaabogalinta ama kormeerida waxaa ka mid ah: ka dheerow goobta ama qofka lagaa mamnuucay, ha jabin sharciga, dhamaaystir adeegga bulshada oo dhan, ka qeab qaado goobaha talo bixinta oo lagu faray, dhamaaystiro daweynta lagaa daweynayo qamriga ama daroogo kale, ka qeybgal fasalka wax ka qabashada dadka xadkudubka sameeye, ama bixinta qarashyada magdhowga ee la xiriira dembiga).

a. Waxaa laga yaabaa natiijooyinkan suurtagalka ah aysan wax tar kuu lahayn si aad u hesho nabadgelyo ama amaan sugan. Haddii aad leedahay wax su'aalo ah oo quseya amnigaaga iyo qaabka xukunka u saameyn karo xaaladaada, fadlan la xiriir xafiiska u-dooaha.

Talaabooyinka rabshadaha culus ka dhexdhaca qoyska waa kala duwan yihiin; la hadal qareenkaaga ama xafiiska xeer ilaaliyaha deegaanka aad ku sugantahay si aad u-hesho aqbaar dheeraad ah haddii eedaysanaha lagu soo oogay fal dambiyeed weyn.

Waa maxay Amar Maxkamadeedka oo ah Ilaalinta Ku Meelgaarka?

AKa dib marka uu dambi dhaco, iyo wakhti kasta oo lagu gudo jiro maxkamadeenta kiiska dembiilaha, dhibanaha wuxuu ka codsan karaa maxkamada inay amar bixiso uu dhibanaha ku helo ilaalin ku meelgaar ah. Amarka ay maxkamadu bixiso oo ah ilaalinta ku meelgaarka dhibanaha ayaa socda ilaa kiiska maxkamadeenta ku soo afjarmo joojin ficilada qofki lagu soo oogay (Eedeysanaha) sida:

- Dhibanaha oo lagula xariiro taleefoon, loo qora arji, loo qora iimayl, ama loosoo dirsada qofkale.
- U dhawaansho loo dhawaado dhibanah goobta uu daganyahay, meel waliba ha ahaatee.
- Ku noolaansho deegaan la lawadaago dhibanah.

Ilaa linta ku meelgaarka kasoo fulay maxkamada mararka qaar waxaa lagu soo dari karaa caruuta. Ilaalinta ku meelgaarka intabadan waxaa la codsadaa wakhtiga maxkamadeenta ama eedeysanaha la soo taago maxkamada, laakiin waxaad fursad u weyn kartaa inaad codsato ilaalin ku meelgaar ka hor inta aan lasiideyn eedeysanaha haddii isga ama iyda la xero. Waxaa kaloo muhiim ah in la xasuusto in ilaalinta ku meelgaarka ay dhamaato islamarka kiis dambiyeedka soo afjarmo, arintaas waxay dhici kartaa xililkasta oo kamid

ah kulanka maxkamada ama u dhaxeeya kulumada maxkamada adiga oo ka warhayn.

In la Qilaafo Amarka Maxkamada ee Ilaalinta Ku Meelgaarka waa Dambi. Haddii eedeysanaha ku xadgudbo Amarka Ilaalinta ku meelgaarka, si deg-deg u-wac xukuumada / fulinta sharciga ama xafiiska xeerilaalinta kuugu dhaw. Si aad u qorsheesato amnigaaga, ama nabadgalayadaada la xariir xafiiska u-doodaha kuugu dhaw ama qareen sida ugu dhaqsiiyaha badan ay kuugu suurta gasho.

Ogow Xuquuqdaada!

Dhibane ahaan waxaad xaq u-leedahay:

- In laguula dhaqmo si cadaalad ah, iyo lagu tixgaliyo amnigaaga, sharaftaada, iyo asturnaantada;
- Markaad codsato, in lagu ogaysiiyo dhamaan talaabooyinka dacwadaha dadweynaha iyo in lagu soo xaadariyo ama ka soo qeab galkaadada;
- In lagu maqlo oo aad ka hadli karto inta badan dhageysiyada maxkamada kadhaco ee ku saabsan kiisaka;
- Si macquul ah in laguugu fidiyo ilaalin lagaa ilaalinyo eedeysanah ama shaqsi waliba matalaya eedeysanaha;
- Markaad codsato, si macquul ah in laguugu wargaliyo haddii eedeysanah lasii deeye ama baxsaday;
- In aad diidi karto wareeysi, su'aalo weydiin ama codsiyo kale oo baaritaan ah ka yimaado eedeysanaha ama wakiilka eedeysanaha;
- Dib usoo celin (in dib laguugu gudo qarashki kaga qasaariye, si magdhaw ahaan) lagasoo gudo eedeysanah;
- Tilaabooyinka dacwada inay ka madaxbanaanayihiin daahin aan macquul ahayn la daahiyo iyo in kalifaad laguugu kalifo inad kiiska dhameeso ama soo afjarto;
- Markad codsato, in aad lahadli karto xeer ilaaliyaha; iyo
- In lagugu wargaliyo, si qoraal ahaan, dhamaan xaquuqdaada.
- In aad haysato udoodaha dhibanaha oo dhamaan kaala qeebqaat0 tilaabooyinka dacwada oo socda.
- In aad weysdiisan karto amarka maxkamada ee ilaalinta ku meelgaarka kiiska dhexdiisa.
- In aadan baqin ama lagu hanjabin si aadan ooga marqaati kicin maxkamada. Haddii qof-sida qofki kugu xadgudbay, qareenkiisa ama shaqsi kale- ku yiraahdo ama wax kugu sameeyo ku cabsigaliso inaad ka qeebqaadato kiiska, wargali udoodaha ama xeer ilaaliyaha si deg-deg ah.

Qaar ka mid ah xaquuqyadan ayee tahay in aad su'aalato si aad u hesho. Haddii aad u-baahantahay in lagaa caawiyo qaabka aad ugu su'aalan laheed xaquuqdaada si qoraal ah, booqo boga intarneedka www.ocvj.org/marsys-law iyo "Get the Form."



odvn.org | 800-934-9840